



CHILD CARE SUBSIDY PROGRAMS (CCSP)
Ogeysiiska Joojinta CCSP
CCSP Termination Notice

LAMBARKA TELEEFONKA EE XARUNTA XIRIIRKA ADEEGA MACMIILKA	LAMBARKA FAKISKA EE XARUNTA XIRIIRKA ADEEGA MACMIILKA
LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA	TAARIIKHDA

- Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Daryeelka Ilmahaag wuxuu dhammaan doonaa _____. Lacag bixinadu waxaa ay dhammaan doonaan taariikhdan sababtoo ah:
 - Adiga waxaad ka noqotay ama ka baxday codsigaaga caawimaada ilmaha. WAC 110-15-0120.
 - Adigu ma haysatid ilmo u qalma sida ku cad xeerka WAC 110-15-0005.
 - Adigu kuma noolid gudaha Washington. WAC 110-15-0005.
 - Waxaad ku guuldareysatay in aad bixiso, ama aad sameyso qaab aad ku bixisid, qeybta lacagta ee adiga lagaa rabo sida ku cad WAC 110-15-0030.
 - Dakhligaagu waa mid ka sarreeya qaddarka ugu badan ee loo oggol yahay xaq u yeelashada barnaamijka sida ku cad xeerka WAC 110-15-0005.
 - Ilahaaga dhaqaale waa kuwo ka sarreeya qaddarka ugu badan ee loo oggol yahay barnaamijka sida ku cad WAC 110-15-0005.
 - Adigu 14 maalmood gudahooda ma gelin hawsha Workfirst ee la oggolaadey. WAC 110-15-0110.
 - Adigu 14 maalmood gudahooda ma gelin hawsha la oggolaadey. WAC 110-15-0110.
 - Adigu ma soo celinin xaqiijinta dakhliga la codsadey marka ay tahay ama ka hor maalinta lixdanaad ee loogu talagalay dakhliga soo sheegida-shakhsiga ee shaqada cusub ama la bedelay. WAC 110-15-0110.
 - Waxaa lagu oggolaadey Muddada Dheerayska ee Dadka Guri La'aanta ah adigana ma: WAC 110-15-0023.
 - Bixin wax xaqiijinaya in aad gashey shaqo la oggol yahay, WorkFirst, ama barnaamij tababar.
 - Coo celinin xaqiijinta dakhliga la codsadey dhammaanka muddada dheerayska ah ee dadka guri la'aanta ah.
 - Bixinin lacagta, ama ma sameyn qaab aad ku bixinayso, qeybta lacagta ee adiga lagaa rabo ee aadan weli bixin.
 - Waxkale:

Xuquuqaha Dhageysiga

Haddii aadan oggoleyn go'aankan, waxaad codsan kartaa dhageysi adiga oo la xiriiraya xafiiskan ama u qoraya waraaq Office of Administrative Hearings, P O Box 42489, Olympia, WA 98504-2489. Waa in aad codsato dhageysigaaga:

- Marka ay tahay ama ka hor taariikhda dhaqan galka uu dhaqan galeyo ficilkan ama tallaabadan ama wax aan ka badneyn 10 maalmood ka-dib marka aynu kuu soo dirno oggeysiiska tallaabadan, HADDII aad qaadatid dheefaha hadda oo aadna doonaysid in ay kuusii socdaan, ama
- 90 maalmood gudahooda laga soo bilaabo taariikhda aad hesho warqadan.

Meesha dhageysiga, waxaad xaq u leedahay in aad nafsadaada matasho, in uu ku matalo qareen ama qof kale oo aad dooratid. Waxaad awoodi kartaa in aad heshid tallo sharci oo lacag la'aan ah ama qof adiga ku matala adiga oo la xiriira xafiiska adeegyada sharciga ah. Fadlan wac lambarka xagga sare ee Xarunta taleefoonka haddii aad qabtid su'aalo.

Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan nagala soo xiriir lambarada kor lagu qorey.